



### Deeqaha Cadaaladda Deegaanka 2021

Barnaamij ka socda Magaalada Seattle. Oo ay bixisay Bullitt Foundation.

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno in barnaamijka Deeqaha Caddaaladda Deegaanka uu hadda aqbalayo arjiyada iyo in **waqtiga kama dambaysta ah ee arjiga uu yahay 4ta galabnimo Isniinta Sebteember 13-keeda!** Deeqdani waxay taageertaa dadaallada ay hogaaminayaan waxaana looga faa'ideyn doonaa dadka sida aadka ah u saameeyeen arrimaha deegaanka iyo cimilada: Dadka Madowga ah, Asalka ah, Dadka Aan Cadaanka Ahayn, soo galootiga, qaxootiga, dadka dhaqaalahoodu hooseeyo, dhalinyarada iyo odayaasha.

Mashruucyadu waa inay kujiraan xalal bulshada ay qeexday kuwaas oo kobcinaya caafimaadka iyo badqabka deegaanka iyo bulshada waana inay ka jawaab celiyaan saamaynta ka timaada isbedelada cimilada. Xalalkaas waxaa ka mid ah dhisidda awoodda aqooneed, qorsheynta istiraatiijiyadeed ee joogtada ah, waxbarashada bulshada, dadaallada wax looga qabanayo u diyaargarowga cimilada, tayada hawada, cunno yarida, shaqooyinka cagaaran (shaqooyinka ilaaliya deegaanka), iyo arrimaha kale ee la xiriira cadaaladda iyo cimilada deegaanka.

Sanadkan Cusub!

1. Sababo la xiriira tirada ballaaran ee soo-jeedimaha aan fileyno inaan helno, lama martiqaadi doonno dhammaan codsabayaasha inay ka soo qeybgalaan bandhigyada afka ah ee wareegaan. (Wareegyadii hore, bandhigyada afka ah waxay ikhtiyaari u ahaayeen dhammaan codsabayaasha.)
2. Waxaan fidin doonaa casuumaadaha bandhigyada afka ah kaliya hadii ay jiraan su'aalo ku saabsan mashruuca la soo bandhigay iyo haddii sharaxaad dheeraad ah loo baahan yahay. **Haddii la casuumo, codsabayaashu waa inay kaqaybqaataan bandhigyada afka ah si ay horey ugu gudbaan hawsha.**

Mashaariicda waxaa la siin doonaa wax aan ka yarayn \$25,000 iyo wax aan ka badnayn \$75,000. Mashruucyadu waxay bilaaban doonaan Janaayo 2022 waana in la soo gabagabeeyaa Juun 2023.

Kulamada macluumaadka waxaa la qaban doonaa **Agoosto 16 & 25**. Caawinaad farsamo ayaa loo heli doonaa codsabayaasha si looga caawiyo geedi-socodka. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa khadka tooska ah ee [seattle.gov/environment/ejfund](https://seattle.gov/environment/ejfund).

Su'aalo? Fadlan shashada kula iriir: [ejfrfp@gmail.com](mailto:ejfrfp@gmail.com)